

# LIISKA EREYADA jirka, galmada iyo caafimaadka

Somaliska

ORDLISTA  
Kropp, sexualitet  
& hälsa





# LIISKA EREYADA jirka, galmada iyo caafimaadka

Qaamuuskani wuxuu ka kooban yahay ereyada ku saabsan caafimaadka iyo galmada iyo xuquuqda taranka. Amarku wuxuu ku saabsan yahay jirka, dareenka, xiriirka, jinsiga, aqoonsiga, caafimaadka iyo sharciyada. Helitaanka aqoonta arimahan waa mid sax ah.



ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Abort	Ilmo soo ridid	Marka qof uur leh uusan rabin ilmaha, qofka isbitaal uu ka sameyn kara ilmo iska soo rididda. Iska soo ridida kadib uurka ma leh qofka.
Adoption	Kafaalo-qaadka	Marka hal qof ama ka badan ula wareegaa mas'uuliyadda xanaanada ilmaha. Asagaa ama iyagaa waxay markaa u noqdaan cunugga waalid ama waaalidiin.
Akut p-piller	Kiniinka degdegga ka hortagga uurka	Kiniin aad si degdeg ah u qaadan karto, taasoo ah saddex ilaa shan malmöod ka dib mar aad galmoontay adigoon isticmalin ka hortagga uurka.
Anal	Futada	Furitaanka futada. Sido kale loo yaqaan dabada.
Analsex	Galmo futo	Galmada futada ama wareeraha futada, tusaale ahaan isticmaalka faraha, carrabka, alaabta ciyaaraha ama guska.
Androlog	Takhtarka ragga (Androlog)	Takhtar takhasuskiisu uu yahay gus iyo qoore. Takhaatiirta ragga waxay khabirro ku yihiin shaqada iyo cudurrada xubinta taranka. Takhtarka ragga wuxuu xitaa ka jawaabi karaa su'aalo ku saabsan galmaada.
Asexuell	Niyad la'aanta galmada	Qof niyad oo laheen galmo ma dareemo ama wax yar dareema rabitaanka galmada, ama ma rabin inuu dad kale la galmoodo.
Assisterad befruktning	Taran kalkaalint	Marka hay'ad daryeel ay kalkaaliso lammaane ama qof raba inuu uur yeesho hase ahaatee aysan taas u suurtogaleynin caawimo la'aanteed. Tusaale ahaan waxaa <i>taran kalkaalinta</i> ka mid ah dumar shahwo lagu beero iyo IVF (dhalo ku bacrimin).

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Avbrutet samlag	Galmo la joojiyey	Marka ayadoo galmada siilka socoto la joojiyo galmada joojiso galmada ka hor intuusan guska biyo-baxin oo siilka baanaankiisa ku biyo-baxdo.
Bakteriell vaginos	Bakteeriyyada cambarka	Dheecaan ur leh ka soo baxa siilka. Bakteeriyyada cambarka waxay la mecne tahay in aysan jirin isbeddel isu dheelli tiran ee u dhixeyya bakteeriyyada siilka.
Balanit	Dhalfo-caabuq (Balanit)	Caabuq ku dhaca dhalfaha guska ee kenea inuu maqaarku casaado, inay ka soo baxaan finan yaryar oo guduudan ama in aagga dhalfaha iyo xitaa dhinaca hoose ee buuryada laga dareemo cuncun iyo danqasho.
Barnavårdscentral	Rugta caafimaadka carruurta	Rug ilmaha yaryari ay ka heli karaan baa-ritaanno caafimaad, tallaal iyo talobixin. Waxay qaabishaa ilmaha marka ay dhas-haan ilaa ay ka billaabaan fasalka u diyaarinta iskuulka. Waxaa xitaa magaceeda loo soo gaabiyaa oo la yiraahdaa BVC.
Barnmisshandel	Xad gudubka carruurta	Marka qof da'diisu ka yar tahay 18 jir loo geystay rabshad, xad gudub ama aan waalidkiis ama qof weyn oo ka mas'uul ah daryeelin. Garaacida carruurta waa sharci darro dalka Iswiidhan, xitaa waalidiinta, haddii ujeedadu tahay in la barbaarinayo ilmaha.
Barnmorska	Umuliso	Waxay ka shaqeysaa daryeelka uurreyda iyo umulaha, caafimaadka hooyada iyo galmada, uurka iyo la-talin ilmo iska soo ridid.
Barnmorske-mottagning	Xaruunta ummulisada	Rugta qaabiilaad aad tagto markaad uur leedahay oo ku siinaya daryeel caafimaad iyo xakameyn intaad uurka leedahay. Sidoo kale loo yaqaan xaruunta daryeelka uurka ama MVC.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Barnporno-grafibrott	Barnpornografi-brott	Dembii uu qofku tusaale ahaan qaato, hayo, u kala qeybiyo, iibiyo ama haddii kale ogolaado sawirro muujinaya dadka weli ku jira qaangaarka ama ka yar 18 sanadka oo u muujinaya hab galmo ama qaawan.
Barnäktenskap	Guurka carruurta	Waa guurka uu mid ka mid ah ka yar yahay 18 jir. Dalka Iswiidhan lama oggola guurka carruurta.
BB	Waadhka dhalmada	Qaybta aad joogi karto dhowr maalmood kadib dhalmada.
BDSM	BDSM	Waa xuruurfo u taagan ereybixin guud oo ka kooban erayada af-Ingrisiga: <i>bondage and disciplin</i> (xakamayn iyo edbin), <i>domination and submission</i> (awood u sheegasho iyo u sujuudid) iyo <i>sadomasochism</i> (in la is xanuujiyo oo sidaas kaci lagu dareemo). Xaaladdaan waa mid ay tahay in dadka ka qeybqaadanaya ay raali isaga yihiin.
Befruktning	Bacriminta	Marka shahwada iyo ukunta ay ku kulmaan ugxn mareenka. Waxay ka dibna u kobcin karaan uur-jifka hore oo ku dhegaya gidaarka ilma-galeenka.
Binda	Cudbiga haweenka	Waa ilaalinta waxaa loo isticmaalaa in lagu qabto dhiigga caadada. Cudbiga ayaa ku dhegsan dharka hoose.
Bisexuell	Labeeb ah	Qofka labeebka ah ee jacayl ku dhaco iyo/ama wuxuu doonayaa inuu galmo la sameeyo dadka iyada oo aan loo eegin jinsiga.
Bitestikel	Wareega kaydida shahwada	Qayb ka mid ah xubnaha taranka gudaha haddii aad leedahay gus. Wareega kaydiida shahwada ayaa ku jira kiishka.
Blottning	Blottning	Marka qof uu ku soo bandhigo xubnahiisa internetka ama si xaqiiqada ah si uu ugu sameeyo sharafdarro ama uu u sababo dhib. Sharci ahaan waxaa loogu yeeraa xadgudubka dhanka galmaada.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Blygdläppar	Dibnaha siilka	Laalaabka maqaarka ku wareegsan siilk, kintirka iyo kaadi mareenka. Waxaa jira dibnaha gudaha iyo kuwa dibedda.
Bröst	Naaso	Qaybaha jirka ee ku yaal jirka qaybta sare. Naasuhu waxay ka kooban yihii waxy-aabo ay ka mid yihii nudaha baruur iyo qanjirrada caanaha.
Bröstvärter	Ibta naasaha	Meel wareeg ah oo ku yaala bartamaha xabadka oo ka soo baxaya laabta. Qaybta ku wareegsan ibta sidoo kale loo yaqaan hareeraha ibta.
Bög	Nin khaniis ah	Ereyga caadiga ah ee loo garanayo nin khaniis ah.
Cellprovtagning	Tijaabada unugga	Tijaabo lagu baarayo haddii ay jiraan isbeddello unugyada afka ilma-galeenka oo keeni karo kansarka ilma-galeenka.
Cysta	Barar dheecan leh	Barar oo dareere ka buuxo oo ka iman kara xubnaha jirka intiisa badan, oo ay ka mid yihii ugxn-sidaha.
Dejta	Shuukansi	In aad la kulanto ama aad la baxdo qof aad xiiseynaysiid in galmo la sameeysid ama xiriir la yeelato.
Diskriminering	Midabtakoor	Markaad si xun loola dhaqmey ama lagu xadgudbay sababto ah jinsi, hanaanka galmada, aqoonsiga jinsiga, diinta, asalka, da'da ama naafanimada. Eeg jariimooyinka nacaybka, nacaybka khanisiinta, tarbiyada transphobia, cunsuriyadda, nacaybka naafada, jinsiga, sinnaanta jinsiga iyo sinnaanta.
Embryo	Abuur billow ahe	<i>Abuurka billowga ahi</i> wuxuu sameysmaa marka ugaxdu iyo shahwadu ay midoo-baan. Taas waxaa loo yaqaan bacrimin. <i>Abuurku</i> wuxuu dabadeed ku koraa ilmogaleenka ilaa uu ka noqonayo uurjiif dabadeedna ilmo.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Endometrios	Endometriosis	Marka xuubka ilma-galeenka ku baxdo, inta badan ee ku yaala ugxin mareenka ama caloosha. Endometriosis wuxuu keeni karaa xanuun aad u daran oo la xidhiidha caadada.
Engångsligg	Galmada hal mar	Qof aad galmo la sameeysid hal mar.
Ensamstående	Qof keliya	Qof waalid ah oo xiriir jacayl aan la hay-san waalidka kale ee ilmaha.
Erektil dysfunktion	Awood la'aanta kacsiga	Way adag tahay inaad awood u yeelatid kacsasho ama aad sii haysid taagnida guska, xitaa haddii aad dareentid rabitaanka galmo. Sidoo kale lo yaqaan kacsiga jilcay.
Erotik	Isku gal mood ah	Sawirro, farshaxan, suugaan ama filimo leh waxyaabo dareen iyo qaawanaan leh.
Ex	Laamaane hore	Qof aad hore la nooleed, laakiin aanad wada joogin hadda.
Fetisch	Jamasho	Marka shay ama xubin jidhka ka mid ah oo aan loo arkayn wax la xiriira galmada oo keenaya fiicnaan xoog leh, soo jiidas-hada galmada iyo kacsiga, tuusale ahaan sida cagaha ama maqaar.
Fitta	Siiinka	Xubnaha taranka haweenka. Erayga siiinka wuxuu qeexaya dhammaan jinsiga, labadaba xagga muuqaalka iyo xagga gudaha. Xubnaha taranka haweenka. Erayga siiinka wuxuu qeexaya dhammaan jinsiga, labadaba xagga muuqaalka iyo xagga gudaha.
Flickvän	Saaxibad	Gabadh aad xiriir la leedahay.
Flirta	Haasaawid	Si aad u muujiso xiisaha qof aad jeces-hay, qof aad rabto inaad shuukaansi iyo galmo la yeelatid. Sidoo kale loo yaqaan ugaarso.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Flytningar	Dheecaan	Qoyaanka ka soo baxa siilka si uu u nadiifiyo oo u caafimaad u siiyo.
Foster	Uur-jiif	Uur-jiifku waa kaas oo koray gudaha ilmo-galeenka sagaal usbuuc marka qofku uur leeyahay.
Fostervattenprov	Tijaabka biyaha uur-jiifka	Baaritaan loogu talagalay si aad u ogaato haddii ay jiraan wax isbedel ah koromo-soomyada ee uur-jiifka.
Framfall	Framfall	In wax ka soo baxo hoosta siilka ama duleelka siilka. Tusaale ahaan derbiyada siilka, ilma-galeenka, kaadiheysta ama malawadka oo hoos u dhacaya.
Frenulum	Frenulum	Maqaarka u dhexeeya dhalfada iyo guska. Sidoo kale waxaa loo yaqaan xarriga.
Frivilligt sex när förövaren är nära 15-årsgränsen	Galmo ikhtiiyari ah marka dembiilahu u dhow yahay da'da 15-jir.	Haddii ay caddahay in falku uusan ku lug lahayn wax xadgudub oo loo geystay ilmaha, iyada oo la tixgelinayo farqiga yar ee da'da u dhexeeysa qofki geystay falalka iyo ilmaha sidoo kale xaaladaha guud ahaan, dembiiluhu maaha in la xukumo.
Funkofobi	Nacaybka naafada	Dabeecadaha xun, ra'yiga ama dareenka xun ee loo hayo dadka naafada ah, sida dadka ku fadhiya kursiga curyaanka, dadka indhoolaha ama dhegoolaaha. Wixa kale oo lala beegsan karaa dadka qaba jirro daba-dheer sida HIV-ga.
Förhud	Buuryada	Maqaarka khafiifka ah ee ku fadhiya dhalfada guska ama kintirka.
Förhuds-förträngning	Ciriiriga buuryada	Marka buuryada ay cidhiidhi tahay oo aan dib loo celin karo dhalfada. Mararka qaarkood buuryada waxay ku dhegi kartaa dhalfada hoosteeda, mana soo jiidan karto ama dib u noqon kartaa.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Förlossning	Dhalmada	Dhalmadu waa marka ilmuu dhasho. Dhalmadu waxay noqon kartaa mid siilka ah - iyada oo loo marayo siilka - ama iyada oo loo marayo qaybta qallinka.
Förlossningsavdelning	Qaybta dhalmada	Qaybta isbitaalka aad ku dhaleyso cunuga.
Förlossningsdepression	Niyad jabka dhalmada	Murugada la xiriirta markaad currur dhasho.
Förlossningsrädsla	Cabsida dhalmada	Walaaca iyo cabsida dhallida carruurta kahor.
Förlossningsskador	Dhaawaca dhalmada	Dhaawaca ama dillaacin oo dhici kara xagga taranka xilliga dhalmada.
Förlossningsvärkar	Fool	<i>Fooshu</i> waxay bilaabataa marka ilmogale-enku, oo ah muruq, uu isku ururo oo uu ilmaha hoos ugu soo riixo marinka foosha markuu ilmuu dhalanayo.
Försats	Abuurka	Qoyaan ka soo baxa guska mararka qaarkood, marka qofka kacsi hayo laakiinse aan ahayn biyobax.
Förtal	Aflagaado	Waa iyadoo la faafiyo xan ama war qof ku saabsan si dadku kale ay qofkaas iyo dhaqankiisaba fikrad xun uga qaataan.
Glidmedel	Glidmedel	Kiriim loo isticmaalo markaad galmooto, taas oo ka dhigaya galmo raaxo badan. Waxaa la marin karaa guska, siilka iyo futada.
Gnidsex	Galmada marmarida	Galmada aad sameysid markaad sal-saalaxayso ama aad ku riixdid xubinta taranka qof kale xubintiisa taranka ama qaybaha kale ee jidhka.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Gonorré	Jabto	<p><i>Jabtadu waa cudur galmada lagu kala qaado oo inta badan aan lahayn wax astaamo ah laakiin keeni kara xanfaf ama dhibsasho marka la kaadinayo, dheecaan baddelan oo ka yimaada siilk, kaadimareenka ama futada ama xanuun xagga hoose ee caloosha ama qoraha. Jabto aan la daaweynin waxay sababi kartaa madhaleysnimo. Cudurkaani waa mid qallajiye (antibiotik) lagu daaweyn karo. Jabtadu waxay ka mid tahay cudurrada hoos yimaada Sharciiga ka hortagga cudurrada faafa.</i></p>
G-punktsområdet	G-punktsområdet	<p>Meel qallaafsan oo wax yar gudaha ugu jirta siilka. Meeshaa waxaa kuk ulma kintirka, kaadi mareenka iyo gidaarka siilka.</p>
Gravid	Uur	<p>In uurjiif lagu haysto ilma-galeenka ah oo ku jiro caloosha. Uurka wuxuu caadi ahaan soconayaa sagaal bilood.</p>
Graviditetstest	Tijaabada uurka	<p>Baaritaanka aad sameyn kartid si aad u ogaato haddii aad uur leedahay. Tijaabada sida loo sameeyo waa in loogu kaadsho saad qiyaas ah.</p>
Grooming	Grooming	<p>Marka qof qangaadh ah uu soo jeediyo in uu la kulmo ilmo da'diisu ka yar tahay 15 sano, inta badan internet-ka, ujeedaduna tahay inuu galoo weerar galmo. Waa sharci darro. Sharci ahaan waxaa loogu yeeraa xiriirka carruurta ee ujeedooyinka galmada.</p>
Gruppsex	Galmo kooxeed	<p>Marka in ka badan laba qof ayaa isku galmoodaan isla mar.</p>
Gynekolog	Takhtarka dumarka	<p>Takhtar takhasuskiisu uu yahay gumaar iyo siil. <i>Takhaatiirta dumarka</i> waxay khabibirro ku yihiin uurka, shaqada iyo cudurrada xubinta taranka. <i>Takhtarka dumarka</i> wuxuu xitaa ka jawaabi karaa su'aalo ku saabsan galmada.</p>

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Gynekologisk undersökning	Baaritaanka caafimaadka dumarka	Baaritaan siilka ah ayaa lagu sameeyaa isbitaal, xarun caafimaad ama xarunta soo dhaweynta dhalinyarada.
Göra slut	Kala tagid	In la joojiyo xiriirka. Marka la kala tago, ma isla socdaan lammaanaha.
Ha lust	Rabitaan	Si aad u dareento rabitaan xoog leh. Mararka qaarkood waxay ku saabsan tahay rabitaanka galmada.
Hallick	Fataal	Eeg ereyga <i>koppleri</i>
Hatbrott	Dembiyada naceybka	Waa iyaadoo qof loo geysto falal dembi sida hanjabaad ama jirdil, ujeeddada laga leeyahyna ay tahay sharafdhac ku saleysan qofka hannaankiisa galmo, jinsigiisa, midabkiisa, diinta uu aaminsan yahay, qawmiyaddiisa iyo asalkiisa.
HBTQ-person	HBTQ-person	Kooxda erayo ee loogu dadka labeebka ah, jinsi-wadaag ah, transgender ama queer.
Hedersrelaterat förtryck och våld	Cadaadiska iyo dhibbataynta arrimaha la xidihiidha sharafta	Marka qof, inte badan gabar dhalinyaro ah, lagu xaddidi doonaa oo ay xukumaan dadka kale u dhow, iyadoo kormeerka la sameynayo si loo ilaaliyo ama soo celinta sumcadda ama sharafta qoyska. Sharci ahaan waxay noqon kartaa hanjabaad sharci darro ah, xadgudub, xadgudub guur, dil iyo in ka badan.
Hen	Hen	Magacaabid dhexdhexaad ah. Ereyga <i>Hen</i> sidoo kale waxaa loo isticmaalaa markuu jinsigu aan xiiso lahayn.
Hepatit	Cagaarshow	<i>Cagaarshow</i> waa caabuq ku dhaca beerka. Waxaa jira noocyoo kala duwan oo cagaarshow ah. Kuwa ugu caadisan waa cagaarshow A, cagaarshow B iyo cagaarshow C. <i>Cagaarshowga</i> waxaa sababa fayras.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Herpes	Herbes	<i>Herbes wuxuu ku dhacaa afka iyo xubinta taranka. Herbesku wuxuu leeyahay nabarro dheecaan leh iyo nabarro leh cuncun, mudmud iyo xanuun farabadan ama kuwo aan haba yaraatee waxba laga dareemin. Si fudud ayaa herbeska la isku qabadsiin karaa.</i>
Heterosexuell	Jinsi toosan	Qofka jinsi toos ah waxaa ku dhacaa jacayl, iyo / ama wuxuu doonayaa inuu galmo la sameeyo qof jinsi kasoo horjeeda ah.
Hiv	HIV	<i>HIV waa fayras ay dadku kala qaadaan. Tusaale ahaan markay cinjirka galmoda la'aantiis galmodaaan ama hal cirbad wada isticmaalaan. HIV wuxuu dhaawaca habdhiska difaaca jirka. Haddaan daawo loo qaadan wuxuu HIV isku badde-laa AIDS, kaas oo ah cudur dilaa ah. Marka HIV daawo loo qaato cidna lama qabadsiin karo, iskuma baddelayo AIDS, waxaana la noolaanayaa wakhti la mid ah dadka kale. Dhammaan dadka ku dhaqan Iswiidhan xaq ayey u leeyihiin tijaabo iyo daawo HIV oo bilaash ah.</i>
Homofobi	Homofobi	Dabeecadaha xun, ra'yı ama dareen ka soo horjeeda labeebka iyo khaniisiinta. Waxaa badanaa lagu muujiyaa fikrad-da, quudhsasho, xanaaq, nacayb ama rabshad.
Homosexuell	Khaniis	Ninka khaniisku wuxuu ku dhacaa jaceyl iyo/ama wuxuu rabaa inuu galmo la sameeyo ragga. Naaga khaniisadda ah waxa ku dhacaa jaceyl iyo/ama waxay rabtaa inay galmo la sameeyso naagaha.
HPV (humant papillomvirus)	HPV (humant papillomvirus)	Fayras caadi ah oo u jira noocyado duwan. Qaar ka mid ah noocyada fayraska ah waxay keenaan burooyinka (condyloma) ama isbeddelada unugyada Noocyada kale ee fayrasyada waxay bix-saa burooyinka gacmaha iyo cagaha.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
HPV-vaccination	Tallaalka HPV	Tallaal ka difaacaya noocyada HPV qaarkood oo sababi kara isbeddellada unugyada afka ilma-galeenka oo keeni kara kansarka ilma-galeenka.
Hångla	Salaaxaya	In jidhka la isku soo dhaweyyo oo la is dhunkado, habbsiyo iyo la isku salaaxo dhar la'aan ama iyadoo dhar la xiran yahay.
Ickeбинär	Jinsi dhexe	Qof oo aan dareemin inu nin ama naag yahay.
Incest	Incest	Markuu qof xiriir qaraabo dhow la leh ilmo oo ka dib faraxumeyn galmo u geysanaya ilmaha, sida xadgudub oo kale, tusaale ahaan waalid, awoowe, ama walaalo ka weyn. Sharci ahaan, waxay noqon kartaa kufsi carruurta, haddii ilmuu ka yar yahay 18 sano, la galmoonayo ilmo ama galmo leh walaalo.
Infertil	Madhalays-nimo	Marka qof uusan uur yeelan karo iyo/ama qof uurayn karin.
Informationsplikt	Waajibka warbixinta	Xeer habraac ee quseeyaa dadka qaba cudurada galmada la isugu gudbiyo, sida HIV, xabada ama jabtada, iney u sheega-an dadka ay la galmoonayaan iney qabaan cudurada galmada lagu kala qaado. Takhaatiirtu ayaa go'aaminaya waajibka wargelinta laakiin meesha wey ka saari karaan xaaladaha qaarkood.
Inseminering	Bacrinta	Si hab dhaweyn ah shahwad loogu meeleyyo ilma-galeenka si qofka uu uuraysto.
Intersexvariation	Labeebnimo	Waa ereybixin guud ee loo adeegsado qof leh astaamo jireed oo kala duwan oo aan jinsigiisa si fudud loo astayn karin oo aan la waafajin karin nidaamka kala saarka jinsiga ee bulshada, micnihii aan ahayn "nin" ama "naag" toos ah. <i>Labeebnimadu</i> waxay khusayn kartaa xubnaha taranka muuqda iyo/ama kuwa daahsoon, koromosoomyada iyo heerarka hoormoonnada.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
IVF	IVF (dhalo ku bacrimin)	<i>IVF waa daryeel ah in ugax lagu bacrimiyo shahwo meel ka baxsan jirka. Ugax la bacrimiyey waxaa loo yaqaan abuur billow ah. Dhawr maalmood bacriminta ka dib wuxuu takhtarku abuurka bilowga ahi ku beeraa ilmogaleenka. IVF waxaa iyana loo yaqaan “dhalo ku bacrimin”.</i>
Juridiskt kön	Jinsi sharci ah	Jinsiga u qoran qof ku jira diiwaanka, sida diiwaanka dadweynaha iyo baasaboorka.
Jämlikhet	Sinnaanta	Marka dad ka tirsan kooxo kala duwan lala dhaqmo si isku mid ah, ayna leeyihin xuquuq iyo fursado isku mid ah si ay u qaabeeyan noloshooda oo ay si firfircoona uga qayb qaataan bulshada.
Jämtälldhet	Sinnaanta ragga iyo dumarka	<i>Sinnaantu waa marka ragga iyo dumarku ay leeyihin fursado isku mid ah ay ku saameyaan bulshada iyo noloshooda gaarka ah. Si ay ragga iyo dumarku u yeeshaan awood isku mid ah waa inay leeyihin fursado, xuquuqo iyo waajibaadyo isku mid ah.</i>
Kejsarsnitt	Qalliinka dhalmada	Qalliinka micnaheedu waa in takhtar jeex-ayo caloosha iyo ilma-galeenka si uu uga soo saaro ilmaha.
Kirurg	Takhtarka qalliinka	Takhtar ku takhasusay samaynta qalliinka.
Klamydia	Kalamiiidiya	<i>Kalamiiidiya waa cudur galmada lagu kala qaado oo inta badan aan lahayn wax astaamo ah laakiin keeni kara xanfaf ama dhibsasho marka la kaadinayo, dheecaan baddelan oo ka yimaada siilka, kaadimareenka ama futada ama xanuun xagga hoose ee caloosha. Kalamiiidiya aan la daaweynin waxay sababi kartaa madha-leysnimo. Cudurkaani waa mid qallajiye (antibiotik) lagu daaweyn karo, wuxuuna ka mid yahay cudurrada hoos yimaada Sharciga ka hortagga cudurrada faafa.</i>

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Klimakterie	Cisagoyska	Waqtiga nolosha marka ay caadada joogsatay. Inta badan 50 sano marka la gaadho.
Klitoris	Kintirka	Qayb ka mid ah siilka. Waxay ku tallaa afka kaadi mareenka. Qaybta dusha ee kintirka, dhalfada wa mid oo nugul ah taabashada.
Klitoris ollon	Dhalfada kintirka	Dhalfada kintirka waa qayb ka mid ah kintirka oo ka muuqda jidhka baanaankiisa. Waa mid u nugul ah taabashada.
Knulla	Wasmo	In galmo lala sameeyo hal ama dhowr qof oo kale.
Knollkompis	Saxiibka galmada	Qof aad la galmoontid laakiin aad aan jeclayn. Sido kale loo yaqaan 'KK' oo loo eegi karaa xiriirkha galmada.
Kondom	Cinjir	Maadada ka hortagga uurka ee laga sameeyey caag. Waxaa loo gashada guska si looga hortago gudbinta cudurrada xubinta taranka iyo uurka aan la rabin.
Kondylom	Kondiloom	Kondiloom waa cudur galmada lagu kala qaado oo keeni kara inay burooyin ka soo baxaan xubinta taranka. Burooyinku waxay yeelan karaan cuncun, xanfaf ama mudmud.
Koppleri	Fataalid	Inad saamayn ku yeelatid maskaxda qofka inuu galmo lacag ku bedesho ama ka faa'iideysato xaaladda oo kale si aad lacag u hesho.
Krama	Habsiin	Inaad gacmahaaga ku haysid hareeraha qof kale oo jidhkiina isku riixdan.
Kroppsvätska	Dheecaanka jidhka	Wax qoyaan ka soo baxa jidhka. Tusaale dareerayaasha jidhka waa dhiig, saxaro, saliidayn iyo abuurka.
KSK (kvinnor som har sex med kvinnor)	HIG (haweenka isku galmodaa)	Ereyga loogu talagalay dadka isu yaqaana haweenka ee galmo la yeesha haweenka kale.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
KUB-test	Tijaabada KUB	Saami dhiig iyo codka ultrada oo lagubaarayo uurjif ku jira caloosha qof uur leh.
Kuk	Gus	Xubnaha taranka ragga. Inta badan wa erez ka daran guska.
Kurator	La taliye	Waxay u shaqeyaan taageeridda dadka calool xumo dareemaya, iyadoo la adeegsanayo hadal taageero ah. La taliyaha wuxuu ka shaqeyaa tusaale ahaan isbitaalada iyo dugsiyada.
Kvinnofrids kränkning	Xadgudubyada dumarka	Markuu nin uu kula kaco haweeneey uu lan nool yahay weerar habaysan oo xad-gudub ah. Tusaale ahaan, iyada oo la garaacay, lagu qasbey in ay galmooto, iyada loo geestay xadgudub maskaxeed ama laga xadiday inay ka tagto guriga.
Kvinnojour, tjejjour	Heeganka dumarka, heeganka gabdhaha	Hay'ad taageerta oo caawisa dumarka iyo transgenderka uu qof ay xigto yihii u geysatay gacanqaad, tusaale ahaan hooyayaa laga heli karaa haddii qofka dumarka ahi loo hanjabayo.
Kvinnoklinik	Haweenka dumarka	Qaabilaad oo daaweya cudurada ku saabsan ilma-galeenka. Haweenka uurka leh waxaa laga yaabaa inay halkan u yimaaadaan adeegyo ay ka mid tahay baaritaanka qalabka la dhagaysto ilmaha caloosha. Cusbitaalada waaweyn badigooda waa laga helaa.
Kyssa	Dhunkasho	In afka la isku dhunkado iyada oo carabka uu carabka kale taabanayo.
Kåt	Kacsi	Dareenka jirka ee qofka doonaya galmo inuu isku sameeyo ama qof kale ku sameeyo.
Känna olust	Dareenka niyad xumo	Marka qofku uusan dareemeynin raaxo ama wax farxad leh.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Kön	Jinsi	Inta badan waxaa loola jeedaa qof lab ama dheddig. Jinsi wuxuu sidoo kale macnaheedu noqon karaa xubnaha taranka.
Könsbaserat våld	Tacaddiga la xiriira jinsiga	Gacanqaadka loo geysto dumarka iyo dadka LGBT. Badiyaan waa nooc ka mid ah tacaddiga iyo xadgudubka la xiriira gal-mada. Eeg <i>Ka ganacsiga dadka ujeedka gal-mada, rabshadaha xiriirka, xadgudu-byada dumarka iyo heeganka dumarka/heeganka gabdhaha</i> . Eeg xitaa xadgudu-byo galmo iyo caadooyin waxyello leh.
Könsbekräfande behandling	Daryeelka sixidda jinsiga	Daryeel ku aaddan in la beddelo jirka qofka si uu u waafaqo aqoonsigiisa jinsi, sida nin, naag ama jinsi dhexe. Daryeelku wuxuu noqon karaa in qallii lagu sameeyo xubinta taranka ama in hormoonno la qaato si loo beddelo muuqaalka jirka. Dad badan, ma aha dhammaan, oo transjender ah ayaa waxay jecel yihiin inay maraan nooc ka mid ah daryeelka sixidda jinsiga.
Könsdysfori	Niyad xumada jinsiga	Ooganshaha xaqiiqda ah in jidhkiisu uusan waafaqsanen nooca jinsi ee qofka Qofka qaba niyad xumada jinsiga ayaa laga yaabaa inuu rabo daryeelka xaqijinta jinsiga.
Könsidentitet	Aqoonsiga jinsiga	Jinsiga qofku dareemayo inuu leeyayah. Aqoonsiga jinsiga waxba kuma laha jihada gal-mada.
Könsorgan	Cudurka xu-binta taranka	Qaybaha jirka ee ubucda hoose sida guska iyo siilka.
Könssjukdom	Cudurka xubinta taranka	Infekshanka ku dhaco qof aanu markuu la sameeyo galmo aan la ilaalin qof kale oo qaba cudurada xubinta taranka.



ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Könsstypmpning	Gudniinka xubnaha taranka	In kintirka la gooyo ama la dhaawaco. Maraka qaarkood ayaa dibnaha waaweyn ama dibnaha yaryar ee siilka la gooya kadiyna la isku tolaa. Waxaa loo tixgelinayaan inuu yahay xadgudub daran oo xuquuqda aadanaha, wuxuuna dalkan iswiidhan ka yahay sharci darro. Sidoo kale waa sharci darro in la qorsheeyo, la isku dayo, la diyaariyo ama la geeyo gabadhama dumur dal kale si loo sameeyo. Gudniinka xubinta taranka waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa gudniinka gabdhaha.
Könsutredning	Baaritaanka jinsiga	Baaritaan lagu ogaanayo in qofku xaq u leeyahay xaqiijinta jinsiga galmo oo lacag la'aan ah. Dhammaan cidda lagu sheego niyad xumida jinsiga ayaa wuxuu xaq u leeyahay daryeelkan. Cilmi-barista waxaa sameeyaa koox takhasus u leh isbitaalka.
Lesbisk	Khaniisad	Erey caadi ah ee gabadh oo khaniisad ah.
Ligga	Galmo	Inuu galmo la sameeyo hal ama dhowr qof.
Livmoder	Ilma-galeenka	Qayb ka mid ah siilka ee ku jira gudaha jidhka ee caloosha. Halkan ayaa uurjifka ku jira inta aad uurka leedahay.
Livmoderhals	Afka ilma-galeenka	Qeyb hoose ee ilma-galeenka ahna qaybta ugu yar ee ilmo-galeenka. Afka ilma-galeenku wuxuu ku dhamaanayaa daboolka ilma-galeenka.
Livmodertapp	Daboolka ilma-galeenka	Qayb ka mid ah ilma-galeenka oo ka kooaban galitaanka ilma-galeenka oo ka soo baxa siilka.
Lubrikation	Sifaynta	Qooyanka ka yimaada siilka markuu qof dareemayo kacsi iyo rabitaanka galmaada.
Lustgas	Gaaska suuxinta	Nooca xanuun joojiye ah ee aad neefsatiid markaad xanuunka foosha ku qabto. Gaaska suuxinta ayaa loo isticmaala si gaar ah marka dhalaysid.


ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Läkare	Takhtar	Wuxuu ka shaqeeya daaweynta jirrada ama dhaawaca iyo ka hortagga caafimaad darrada.
Mammografi	Baaritaanka naasaha	Baaritaanka raajada ee naasaha ee loo sameeyay si loo ogaaado fiixda iyo burooyinka.
Mansmottagning	Qaabilaada ragga	Qof kasta oo isu aqoonsaday ragga iyo / ama leh guska ayaa u tegi kara daryeel, taageero iyo wadahadal. Rugta qaabilaada ragga ayaa ugu horeeyn ah ka shaqeeya galmaada iyo xiriirka.
Mellangård	Mellangård	Meelaha u dhexeeya futada iyo siilka ama kiishka xiniinyaha.
Mens	Caadada	Dhiiga ka soo baxa siilka oo ka yimid ilmo-galeenka. Wuxuu u yimaadaa si joogto ah, hal mar bishii, laga bilaabo baaluqnimada.
Menskopp	Koobka caadada	Ilaalinta aad wakthiga caadada u isticmaali kartid. Koobka caadada siilka ayaa la geliya wuxuuna ururiyaa dhiiga.
Mensvärv	Xanuunka caadada	Xanuunka aad dareentid xilliga caadada.
Missfall	Dhicinta uur-jiifka	Marka jidhka u joojiyo uurka inta aanu ilmuuhu dhalan.
Monoamorös	Monoamorös	Qofka noocan ah wuxuu rabaa xiriir keli ah taas oo ah hal qof markiiba.
Monogam relation	Hal xaas qabid	Xiriir halka kuwa qayb ka ah isku raaceen in aysan yeelan xiriir galmo ama jacayl dad kale oo ka baxsan xiriirkooda.
MSM (män som har sex med män)	RIG (ragga isku galmaada)	Ereyga loogu talagalay dadka isu yaqaana rag iyo kuwa galmo la yeesha ragga kale.




ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Mykoplasma genitalium	Mykoplasma genitalium	Mycoplasma waa bakteeriya oo keeni karta cuncun ucbuda hoose iyo dheecaanka guska ama siilka. Waxay sidoo kale dhaawici kartaa ubucda hoosteeda ama kiishka xinjirta.
Myom	Myom	Buro aan khatar ahayn oo laga yaabo inuu ku dhaco unugyada muruqa ilma-galeenka. Myom waxaa sidoo kale loo yaqaannaa muruqyada guntan. Myom waa mid caadi ah, oo ku dhow kala badh dadka caadada u timaada ayaa heysta.
Månggifte	Gododlayn	Markuu qof guursado in ka badan hal qof. Iswiidhan lagama oggola in dhawr qof la isku guursado. Dembiga waxaa la yiraah-daa 'tvegifie' (laba qof isku qabid).
Människohandel för sexuella ändamål	Ka ganacsiga dadka ujeedka galma	Qof aad u qasabtid ama kхиiamayso adiga oo u raraya, guddoomaya, ama u gudbinaya si uu qofkaa inuu sameeyo adeegyo galmo.
Nedsatt sexlust	Niyad galma hoos u dhacay	Rabitaan la'aan inaad galmo sameyso ama aadan rabin galmo sida mararka hore aad rabtay.
Njuta	Raaxeysi	Marka wax dareen wanaagsan leh ama ka farxiya.
Ollon	Dhalfada	Qayb ka mid ah guska. Dhalfada wuxuu ku fadhiyaa guska korkiisa oo ah qaybta ugu nugul guska.
Omskärelse	Xalaalayn	Si loo gooyo dhammaan ama qayb ka mid ah buuryada. Mararka qaarkood ereyga xalaalaynta ayaa loo isticmaala gudniinka gabdhaha.

# TUSAALOYIN SAWIR



## Somaliska









LUQUNTA ILMAGALEENKA






AAN NAAFEYSNAYN / AAN GUDNAYN



NAAFEYSAN / GUDAN



NAAFEYSAN / GUDAN



NAAFEYSAN / GUDAN



AAN KACSANAYN




KACSAN




AAN GUDNAYN



GUDAN



AAN KACSANAYN



KACSAN

## KU-WACYIGELINTA AQOONTA GALMADA

Ku-wacyigelinta aqoonta galmada oo dhan kasta ah oo cilmi ku saleysan waxay gacan ka geysanaysaa sinnaanta aadanaha iyo jinsiga. Ku-wacyigelinta wanaagsani ee aqoonta galmada waa in laga helaa aqoon ku saabsan sida uu jirku u shaqeeyo, raaxaysiga, caadooyinka ku saabsan galmada iyo isla-dhaqanka, waana inay suurogelisaa wadahadallo ku saabsan cilaqaadyada iyo dareemada iyo waxyaalo kale oo badan.

## DARYEEL CAAFIMAAD IYO XANNAANAYN WANAAGSAN

Caafimaad wacan oo waara ee taran iyo galmo waxaa aasaas u ah xuquuqda dadweynaha ay u leeyihiin daryeelka caafimaad iyo xannaanaynta wanaagsan. Maanta Iswiidhan caafimaadka taranka iyo galmada waa mid aan si siman loo qaybin. Aqoonta ku saabsan galmada waa inay noqotaa qayb muhiim ah oo ka mid ah nidaamka daryeelka caafimaad si loo daboolo baahida kala duwan ee jirta

## DHALI ISBEDDEL- NOQO XUBIN

RFSU waa urur xubin laga noqdo oo aad dadaalkaaga xooggiisa saari karto dan koobam, mid heer qaran iyo mid heer caalami ah, intaba. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan RFSU ka akhriso [rfsu.se](http://rfsu.se) Macluumaad ku qoran luuqado kala duwan waxaad ka heleysaa [rfsu.se/upo](http://rfsu.se/upo)

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Onanera	Siigeysi	Inaad aad isu galmoonayso. Marka siigay-nayso waa caadi in la salaaxo xubnaha taranka, futada ama qaybaha kale ee jidhka.
Oralsex	Galmada afka	Si aad u galmoontid afkaaga adigoo dhun-kanaya, lalaaleynaya ama aad u nuugtay xubinta taranka qof kale. Sidoo kale loo yaqaan galmada afka.
Orgasm	Biyobax	Dareen raaxo leh oo uu qofku heli karo markuu naftiisa ama dad kale u galmoodo. Biyobaxu wuxuu keenaa in murqa-ha aagga xubinta taranka ay isku soo ururaan.
Orgasmstörningar	Orgasmstörningar	Markuu biyo-baxa uu si dhaqso ku yimaa-do ama in aan caadi ahayn aad sugtid, mar dhif uu imaanayo ama uu maqnaa-nayo hallaabida biyo baxa wuxuu noqon kara in biyo baxu noqdo mid xun ama daciiif ah.
Orosanmälän	Wargelinta xafiiska adeegga bulshada	Inaad u soo sheegto xafiiska adeegyada bulshada in aad ka walwalsan tahay in wax xumaan loo geesanayo ilmo. Ma-callimiinta, takhaatiirta ama shaqaalaha xannaanada carruurta ee ka welwelsan carruurta da'doodu ka yar tahay 18 jir ayaa looga baahan yahay inay soo gudbiyaan welwelka. Shakhsiyaadka gaarka ah qasab kuma ahan iney wargelin sameeyaan laakiinse iney sameeyaan ayaa wacan.
Oskuldskontroll	Baaritaanka bikradda	Marka qof uu sheeganaayo in uu baari karo haddii gabar ayla la galmoontay ama aan galmoon dad kale, taas oo aan lagu ogaan karin hab baaritaan daawo. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ma baari karaan ama kama soo saari karaan shahaado ku saabsan arrintan, iyadoon loo eegin in qofku ogl yahay. Haddii baaritaanka uu kasoo horjeedo rabitaanka gabadha markaa waa xadgudub.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Otrohet	Gogol-dhaaf	Wax galmo aad laa sameeyso qof kale oo aan ahayn qofka aad la nooshahay.
Oönskad graviditet	Uurka aan I a rabin	Inaad uur yeelato adigoo aadan rabin inaad uur yeelatid.
Partner	Lamaane	Qofka aad xiriir la leedahay iyada oo aan loo eegin jinsiga qofku leeyahay.
Partnervåld (mäns våld mot kvinnor i parrelation och våld i nära parrelationer)	Rabshadaha xiriirka (Rabshadaha ragga ee ka dhanka ah haweenka xiriirka iyo rabshadaha ee xiriirada)	Marka qof si maskax ama jidh ahaan u bahdalo qof uu xiriir jacayl ka dhexeeyo.
Penis	Guska	Xubinta taranka ragga.
Perineum	Perineum	Halka u dhexeeysa futada iyo siilkamarka xiniinyaha.
Personlig integritet	Badbaadada qofnimada	Eeg faafiinta sawirradda qaawan ee dadka kale iyo wax ka sheegid (xanta).
Pessar	Cinjirka galmada ee dumarka	Shay yar oo godan oo silikoona ka sameyasan oo siilkamarka laga soo geliyo laguna awdo afka ilmogaleenka. <i>Cunjirka galmada ee dumarka</i> waxaa lala isticmaalaa jel (maaddo xabag u eg). <i>Cunjirka galmada ee dumarka</i> waa qalab looga hortago uureysiga.
Pojkvän	Saxiibka	Wiil aad xiriir la leedahay.
Polyamorös	Gododlaynta	Qofka gododlaynta wuxuu awooda inu jeclaado iyo/ama ay soo jiidato dhowr qof isla waqtii isku mid ah.
Pornografi, porr	Sawirro qaawan	Sawirro iyo filimo dadka qaawan oo loogu talogalay inay ku farxan ama kacsasho ku helaan dadka waaweyn.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
P-piller	Kiniinka ka hortagga uurka	Kiniin qof ilmo-galeen leh uu qaato hal mar maalintii oo looga hortago uurka. <i>Kiniinka ka hortagga uurka</i> waa qalab looga hortago uureysiga, waxaana la helaa isagoo noocyoo kala duwan ah.
P-plåster	Sharootada ka hortagga uurka	Sharooto lagu dhejiyo qof ilmogaleen leh jirkiisa oo toddobaad ka dib laga baddelo. <i>Sharootada ka hortagga uurka</i> waa qalab looga hortago uureysiga.
P-punktsområdet	Aagga barta P	Aag ku yaal futada gudaheeda meel xooga ka sarreysa daloolka oo u nugul taabshada.
Prematur ejakulation	Shahwada waqtii hore ah	In la biyo baxo waqtii ka horeysa waqtiga uu qofku rabo, waa wax dhib ku noqon kara qofka ama lamaanaha qofka.
Premenstruellt dysforiskt syndrom, (PMDS)	Premenstruellt dysforiskt syndrom, (PMDS)	Nooca adag ee PMS. Calaamadaha bändanaa waa maskax ahaan sida niyad jab ama walaac. Niyad jabka iyo daalku waa calaamado kale.
Premenstruellt syndrom, (PMS)	Premenstruellt syndrom, (PMS)	Xanunka jirka iyo maskaxda ee dhacaya dhowr maalmood ka hor caaadada bilooowgeeda. Tusaale ahaan, laabta xanun, madax xanun, isbeddel niyadda, tamar yar iyo niyad jab.
PrEP	PrEP	Daawo la qaadan karo si aad u yarayso halista iaan qaado HIV.
Preventivmedel	Qalabka ka hortagga uureysiga	<i>Qalabka ka hortagga uureysiga</i> waxaa loo isticmaalaa in looga hortago uureysiga, waxaana loogu talagalay dadka raba gal-mada gus la dhex geliyo siil. Tusaaloyinka <i>qalabka ka hortagga uureysiga</i> waa cinjirka galmada, kiniinka ka hortagga uurka ama gariirad. Cinjirka galmada ayaa ah qalabka keliya ee kaa ilaalinaya uurka iyo cudurrada galmada.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
P-ring	Giraanka ka hortagga uurka	Giraanku waa qalab ka hortag uureysi. Waa giraan jilicsan oo caag ah oo uu qofku iskiisa u gashado siilka gudihiisa.
Prostata	Qanjidhka borosteydka	Waa qanjir ku yaal dadka guska leh jirkooda gudihiis, meel u dhexeysa kaadimareenka iyo malawadka. Wuxuu soo saaraa qeyb ka mid ah dheecaanka shahwada.
Prostataundersökning	Baaritaanka qanjidhka manida ragga	Baaritaan qanjidhka manida ragga ee loo sameeyo ayadoo gacanta lagu dareemayo malawadka ama hab dhiig qaadis.
Prostatit	Prostatit	Caabuqa qanjidhka manida ragga, Tan ugu badan waa prostatitis joogta ah. Waxaa kale oo loo yaqaana xanuunka lafaha ee joogtada ah.
Prostitution	Dhilleysi	Eeg ereyga <i>ganacsiga galmada</i> .
P-spruta	Cirbadda ka hortagga uurka	Cirbad uu qof leh ilmogaleen qaato sad-dexdii billoodba mar. <i>Cirbaddu</i> waa qalab ka hortag uureysi.
P-stav	Usha ka hortagga uurka	Ul yar oo jilicsan oo caag ah oo la hoos geliyo maqaarka cududda qof leh ilmogaleen. Ushu waa qalab ka hortag uureysi.
Psyiatriker	Takhtarka maskaxda	Takhtar ku takhasusay cudurka maskaxda iyo xaaladdaha.
Psykolog	Takhtarka cilmi-nafsi	Wuxuu ka shaqeeyaa caafimaadka maskaxda. Tusaale ahaan, wuxuu caawimaad siin karaa dadka aan maskax ahaan ladneen. La hadlida Takhaatiirta cilmi-nafsiyeedka waxaa lagu magacaabaa teraabiyyada.
Pubertet	Baluuqnimada	Wakhtiga nolosha marka jidhku uu ka yimaado caruurnimo una gudbo qaang-aadh. Inta badan, baaluqnimada waxay dhacdaa inta u dhexeysa 8 iyo 13 sano jir.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Pubishâr	Timaha shuunka	Timaha kasoo baxa agagaarka xubinta taranka. Wawa kale oo loo yaqaan timaha xubinta taranka.
Pulla	Cajiimin	Ereybixin loo adeegsado marka qof leh gumaar iyo siil uu naftisa u galmoonayo (seego). Ereyga micniiisu wuxuu iyana noqon karaa in qof kale uu gumaaarka salaaxayo.
Pung	Kiishka xiniinyaha	Bac maqaar oo ku fadhiba guska hoostii-sa. Xiniinyaha iyo wareega kaydida shahwada ayaa ku jirta kiishka xiniinyaha.
Pussa	Dhunkasho	In dibnaha lagu riixo oo la dhunkado qof kale afkiisa ama jidhkiisa.
Queer	Queer	Qofka queer ah wuxuu ka shikiyaya qiiyasta kala duwanaanshaha. Waxaa laga yaabaa inay khuseyso jihada galmaada, aqoonsiga jinsiga ama sida qofku uu xiriir ula yeelanaayo dadka kale. Ereygu wuxuu leeyahay mecno badan.
Rasism	Cunsurini-mada	Dabeeecadaha xun, ra'yiga ama dareen-ka ka dhanka ah dadka leh maqaarka jidhka ee mugdigaa madow ah ama ka soo horjeeda dadka leh asal, diin ama dhaqan kale oo aan aheyn tan uu leeyahay.
Rimming	Leefida dabada	Leefitaanka gudaha futada iyo hareeraha futada.
Runka	Siigeyso	Ereyada loogu talagalay siigaysiga guska. Tusaale ahaan, farahaaga ku salaaxidda xayndaabka dhalfada, ama jiidista buuryada hore iyo gadaal.
Ryggbedövning	Dawada suuxinta dhabarka	Suuxdinta loo isticmaali karo inta lagu jiro foosha ama haddii lagaa qallayo qaybta hoose ee jirka. Sidoo kale loo yaqaan epidural.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Sambo	Wada nool	Lammaane iyagoon isqabin wada nool.
Samlag	Galmo	Inaad galmo samayso. Isu tagid mecnaheeda waa galmo marka guska la gelinayo ama ku xirmayo siilka ama futada.
Samlagssmärta	Xanuunka galmada	Xanuun ku qabanaya markaad galmooto. Xanuunka waxaa laga dareemi karaa siilka, guska, kiishka xiniinyaha ama gudaha jirka.
Samlagsställning	Jagooyinka galmada	Habka jidhka dhinaca loo dhigo marka la galmoonaayho waxaa xitaa loo yaqaan is dhigidda.
Sesammottagning	Qaabilaada Sesam	Rugta qaabiliaada halkaas oo aad u tagtaa inaad isku baadho oo aad hesho daaweynta cudurrada xubnaha taranka. Sidoo kale waxay leedahay talobixinta daawada ka hortaga uurka iyo talobixinta ku saabsan galmada iyo xiriirka.
Sex	Galmo	Si aad u sameyso wax dareen waxan leh. Waxaad isku galmoon kartaa adiga ama dadka kale. In la isu salsalaaxo ama la isu tago aaya ka mid ah.
Sexdebut	Galmada ugu horreysa	<i>Galmada ugu horreysa</i> waxaa loola jeedaa marka ugu horreysa ee uu qof u galmoodo qof kale.
Sexism	Xaqirid jinsi	Dabeecadaha xun, ra'yiga ama dareenkaka dhanka ah haweenka iyo dadka loo arko haween ama dumar. Wuxuu kuu muujin karaa nacayb, quudhin, carro, nacayb ama rabshad ku saleysan qaababka awooda iyo caadooyinka.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Sexköp	Ganacsiga galmada	Inaad wax siiso qof si uu kula galmoodo. Waa sharci darro in la iibsado galmo, laakiin maaha sharci darro in la iibiyo galmo.
Sexleksak	Alaabta ciyaaraha	Wax galmo lagu sameyn karo si wada jira qof kale ama keli ahaan. Tusaale, gus caag ah ama gariiriye.
Sex mot ersättning	Sex mot ersättning	Eeg <i>ganacsiga galmada</i> iyo <i>fataalid</i> .
Sexolog	La-taliyaha galmada	Wuxuu ka shaqeeyaa bixinta wada hadallo taageero ee ku saabsan arrimaha galmada iyo xiriirka dadka iyo lammaanahooda.
Sexställning	Jagooyin wasmo	Habka jidhka dhinaca loo dhigo marka la galmoonayo. Sido loo yaqaan booska galmada.
Sexuell läggning	Jihaynta galmada	Erey tilmaamaya jinsiga ay leeyihiin dadka uu qofku caashaqayo ama uu doonayo inuu u galmoodo. <i>Jihaynta galmadu</i> waxay tusaaletahaan noqon kartaa heterosexuality (nin iyo naag isku galmooda), bisexuality (qof nin iyo naagba u galmooda), homosexuality (khaniisnimo). Sad-dexdaas ayaa ah kuwa ku xusan Sharciga ka hortagga takoorka.
Sexuell praktik	Tobobarka galmada	Siyaabo kala duwan oo galmo loo sameyn karo, tusaaletahaan galmo riix, galmada salaaxa, siigaysi iyo galmada siilkä.
Sexuella fantasier	Khayaaliga galmada	Ka fekerka iyo riyooinka ku jira waxyaabo galmada la xiriira.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Sexuella trakasserier	Dulmi jinsiyeed	Marka qof uu isku dayo inuu qof kale sharafdhac jinsi u geysto, tusaale ahaan marka la joogo goob shaqo ama iskuul. Shaqobixiyaha iyo iskuulka waaxaa waajib ku ah inay taas oo kale ka hortagaan. Ururka shaqaaluhu gacan ayuu siin karaa qof halka uu ka shaqeeynayo lagu dulmiyeey. Eeg xitaa <i>xadgudubyo galmo</i> .
Sexuella övergrepp	Xadgudubyo galmo	In qof aan raali ka ahayn loo geysto fal galmo, tusaale ahaan in sawir laga qaado ama gacmaha lala galo qof jirkiisa isaga oo aan taas raali ka ahayn. Taas iyadoon loo eegin in xoog la adeegsaday ama in qofka falka geystay ama kan loo geystay ay isgaranayaan ama isqabaan. Eeg <i>kufsi, xadgudub galmo iyo dhibta dhanka galmada</i> .
Sexuella övergrepp mot barn	Xad gudubka galmada ee carruurta	Dalka Iswiidan, qof da'disu ka yar tahay 15 jir aaya loo tiixgeliyaan inuu awoodin inuu ogolaansho ansax ah siyo galmda, sidaas darteed mabda'a asaasiga ahi waa in dembi kasta oo galmo ah oo ay geystaan qof qaangaar oo ciqaab mutaysan kara oo ka dhan ah qof ka yar 15 sano waa xadgudub galmo. Hadafku waa in laga ilaaliyo carruurta rabitaanka jinsiga ee dadka waaweyn taas oo micnaheedu yahay in carruurta ka yar 15 jir ay la sameyn karaan galmo kuwa kale ee ayagana caruur ah oo aan dembi ku aheyn haddii ay isku galmodaaan. Fiiri kufsiiga ka dhanka ah carruurta, ka faa'iideysiga galmada carruurta, xadgudubka galmada ee carruurta, galmada ikhtiy-aarka ah marka dembiiluhu uu ku dhaw yahay dadka 15-sano, sawirada qaawan ee carruurta, xadgudubka caruruut, galmada dadka isku ehelka ah, qalqaalinta galmo ee caruruut ee internetka.
Sexuellt ofredande	Dhibta dhanka galmada	In qof aan qayb ka ahayn lagu sameeyo waxyaabo galmo la xiriira, tusaale ahaan taabashda jidhkeeda ama in la tuso sawiro jidh qaawanee muujinaya xubnaha galmada qof si toos ah ama internetka (waxaa loo yaqaan qaawanayn), eeg xadgudub galmo.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Sexuellt utnyttjande av barn	Carrur galmo loogu faaidaystay	Haddii qof uu galmo la sameeyo ama fical galmo la yeesho qofka ka yar 15 sano, wey ka halis yar tahay kufsi Tusaale ahaan, haddii qofku galmo la sameeyo qof wax yar ka yar da'da 15 ayna u dhacdo si ikhiyaarnimo ah.
Sexuellt övergrepp	Xadgudub galmo	Markuu qof fal galmeed u geysto qof aan taas si xor ah uga qeybgalin oo falkaas galmeed sharchiyan aan loo arag inuu yahay mid sharafdhiciisu kufsi gaarsiisan. Eeg <i>kufsi</i> .
Singel	Qof keli ah	Aan ku noolayn xirrir jacayl.
Sjuksköterska	Kalkaalso caafimaad	Waxay ka shaqaysaa daryeelka caafimaa dka ee la taaban karo iyo mid cusbitaal. Waxaa jira noocyoo kala duwan oo xirfadaha kalkaalisada caafimaadka oo la xidhiidha takhasuska qofku uu bartay.
Skadliga sedvänjor	Caadooyin waxyeello leh	Caadooyin ay ka mid yihii gudniinka ama Iswiidhan markay noqoto guur sharcidarro ah, inta badan lagula kaco gabdho iyo dumar. Badanaa waxaa caadooyinkaas micnohoodu yahay ku xadgudub xuquuqda aadanaha iyo awood sheegasho. Eeg cadaadiska iyo dhibbataynta arrimaha la xidhiidha sharafta, gudniinka xubnaha taranka, guurka qasabka, guurka carruurta iyo gododlayn.
Skilja sig	Furriin	In guur jiray la joojiyo. Marka <i>la is furo</i> dib dambe la iskuma qabo. Labada qofba wey dalbar karaan furriin, mana aha shardi in furriinka heshiis lagu yahay.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Skilsmässa	Furriin	Si qofku uu u joojiyo guurka qof kale wuxuu qofku sameynayaa furriin. Dadkoo dhammi waxay xaq u leeyihii iney dalbaadaan furiinka, waxaana ku filan in mid ka mid ah lammaanaha uu doonayo iney kala tagaan.
Slemhinna	Xuub-axaleed	Maqaarka khafiifka ah ee qoyan ee ku yaalla meesha aan ka helno daloolyada jirka - tsusaale ahaan, siilka, kaadi-mareenka, afka, futada iyo buuryada gudahiisa.
Slida	Siil	Duleelka siilka meesha caadada iyo dheecaanka hoosta haweenka ay ka soo bixi karaan. Marka siilka laga dhalaayo ayaa ilmuu waxay kasoo baxaan siilka.
Slidkrans	Giraanka siilka	Maqaarka cidhifka duuduubar ee dhuubar oo qoyan, ee loo yaqaanno xuub-axaleedka. Giraantu waxay ku taallaa meel wax yar kasoo horeysa daloolka siilka.
Smeka	Istiimis	In gacmaha lagu salsaaxo jirka qof kale ama jirkisa isa salaaxo.
Smeksex	Galmada salaaxa	Inaad galmo sameyso adigoo taabanaya xubinta taranka ama jidhka dadka kale.
Smittskydd	Xakamaynta cudurada	Qaranka waxaa xil ka saaran inuu hubiyo in cudurrada qaarkood sida HIV, xabada, jabtida iyo waraabowga aysan fidin. Taa mecnehaadu waa in tallaabooyin qaar waa in la qaadaa haddii la daweynayo cid la qabadsiyyey cudurka. Eeg sharciga kahortagga cudurada, waajibaadka wargelinta macluumaaadka iyo helitaanka raadka qaadsiinta cudurka.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Smittskyddslagen	Sharciga cudurada	Sharci ka hortagaya cudurrada qaarkood, sida xabada, jabtada, eediska HIV iyo waraabowga. Sharciga kahortagga faafitaanka cudurada wuxuu dhigayaa in dadkoo dhammi ay xaq u leeyihiin in ay iska baaraan haddii ay qabaan cudurrada galmada lagu kala qaado iyo in dadka qaba infekshanka cudurka ay helyaan daaweyn lacag la'aan ah. Wuxuu kaloo qeezaya sharciga mas'uuliyadda dawlad-da ee ka hortaggida faafitaanka cudurka.
Smittspärning	Baafinta cudurada	Qofka laga helay infekshanada cudurada qaarkood, sida jabtida ama eediska HIV, waa inuu u sheegaa shaqaalahaa daryeelka caafimaadka dadka uu qofku galmo la yeeshay si dadkaa oo ayagana qabaya infekshanka cudurka ay u helaan fursad ay isku baaraan.
Smärtlindring	Xanuun jebin	Dawada yareysa xanuunka.
Snippa	Siiil	Eregya xubinta taranka gabdhaha yaryar.
Snopp	Gus	Ereyga xubinta taranka wiilasha.
Sperma	Shahwad	Dareeraha ku jira shahwad kasoo baxda guska ee ka kooban unugyada jinsiga ragga.
Spiral	Gariirad	Waxaa laga soo geliyaa siilka, waxaana lagu meeleyaa ilmogaleenka. Waxaa jira laba nooc oo gariirado ah: <i>gariirad hormoon ah iyo gariirad naxaas ah.</i> <i>Gariiraddu</i> waa qalab ka hortag uureysi.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Sprida sexuella bilder på andra	Sawirro dad qaawan faafin	In la faafijo sawirrada galmaada ee qofka asagoo aan raalli ka aheen waa fal dembi. Muhiim maaha haddii sawirada loo soo diray si ikhtiyar ah ama haddii loo qaaday si la qarinayo. Sharci ahaan, waxay noqon kartaa faragelin shakhxiyadeed iyo been abuur sharci darro ah. In si dhuumasho ah loo sawir qaado jidhka qof kale, tusaale ahaan ayadoo lagu jiro qolka labiska, qolka tijaabinta dharka, musquusha ama guriga ayaa si sharci ahaan waxaa loogu yeeri karaa sawirqaadis meel ka dhac ah.
Steril	Madhalays	Marka qofku uusan uur yeelan karin qofna uusan uurayn karin.
Sterilisering	Qalliiin madhalaysnimo	Qalliiin ka yeelaya inuusan qofku uur yeelan karin ama qof uurayn karin.
Sträng	Xadhig maqaar ah	Maqaarka oo u dhixeyya dhalfada iyo guska. Sido loo yaqaan frenulum.
Stånd	Kacsi	Marka guska ama kintirka uu dhiig ka buuxsamo, wuxuu noqdaa mid adag, koraya kadibna kor u kacaya. Sidoo kale loo yaqaan kacsiga.
Svampinfektion i underlivet	Caabuqa xubnaha taranka	Infekshanka sameysmaya marka uu khamiirku bilaabay, inuu ku koro gudaha ama dibedda siilka. Astaamaha waxaa ka mid noqon kara cuncun gudaha iyo dibedda siilka, ama xuub axaleedka ayaa casaada oo barara iyo sidoo kale dheecano cad cad.
Svällkropp	Cadadka barara	Nooc ka mid ah unugyada xubnaha taranka. Maqaar bararka waxaa laga helaa guska iyo kintirka labadaba.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Syfilis	Waraabow	<p><i>Waraabowgu waa cudur galmada lagu kala qaado oo inta badan aan lahayn wax astaamo ah laakiin meelaha uu cudurku ku dhacay ka keeni kara boogo yaryar.</i> <i>Waraabow aan la daaweynин wuxuu, sanado badan ka dib, horseedi karaa cudurro halis ah oo saameyn kara wadnaha iyo habdhiska dareenwadka.</i> <i>Waraabowga waxaa lagu daaweyn karaa qallajiye (antibiotik), wuxuuna ka mid yahay cudurrada hoos yimaada Sharciga ka hortagga cudurrada faafa.</i></p>
Sädesblåsa	Bacda shahwada	<p>Qayb ka mid ah xubnaha taranka gudaha haddii aad qofku leeyahay gus. Bacda shahwada waxay ku fadhidaa gadaasha kaadiheysta ee jidhka gudahiisa.</p>
Sädesledare	Shahwo mareenka Sädesledare	<p>Qayb ka mid ah xubinta taranka ee guska. Dhuumaha shahwada ayaa waxaa lagu raraa shahwada oo la geynayo kaadimareenka marka qofku biyo baxayo.</p>
Säkra perioder	Wakthi amaan ah	<p>Muddada amaanka waxay ka dhigan tahay in qofku galmo sameyn karo inta lagu jiro muddadaa khatarta uurqaadistana ay yar tahay.</p>
Säkrare sex	Galmo amaan ah	<p>Galmada la isticmaalayo cinjir kahorttaga uurkaama galmada loo sameyo hab aan lahayn ama ku yartahay khatarta gudbinta cudurrada galmada lagu kala qaado.</p>
Tafsning	Taabashada xun	<p>Markuu qof taabto jir qof kale isagoon qofka kale taas dooneynin, tusaale ahaan barida, naasaha, bowdada ama xubinta taranka. Taabashada noocaa ah waa sharcidarro oo waxaa sharciga xaggiisa loo yaqaan <i>dhibta dhanka galmada</i>. Eeg <i>xadgudubyo galmo iyo dulmi jinsiyeed</i>.</p>

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Tampong	Taambooni	Waa hab ilaalin oo aad ku isticmaali karto xilliga caadadu joogto. Taambooniga waxaa la geliyaa siilka waxayna nuugtaa dhiigga.
Testa sig	Baaritaan	In tijaabo laga qaado afka, siilka iyo futa-daa si loo ogaado in qofku qabo cudurtada gal-mada lagu kala qaado. Baaritaanka waxaa sidoo kale lagu qaadaa shaybaarka kaadida iyo shaybaarada dhiigga.
Testikel	Xiniinyo	Waxay ka mid yihiin xubnaha taranka gudaha hadduu qofku leeyahaygus. adaad gus leedahay. Xiniinjaha waxay ku jiraan qowraha ee ah kiishka xiniinya. Waxay soo saaraan shahwada iyo hormoonnada qaarkood.
Testikelvridning	Wareejinta xiniinya	Marka xiniinya isku rogaan gudaha kiishka xiniinjaha.
Tidig utlösning	Shahwada wakhti hore	In la biyo baxo muddo aad u gaaban kadib marka qofku galmo sameeyo. Waxaa kaloo loo yaqaan biyobax degdeg ah.
Tjatsex	Galmo hadal badan ku kasbid	In qof aan galmo rabin lagu sii wado su'aalo, qalqaalin iyo cadaadis looga dhaadhicinayo in galmo lala yeesho. <i>Galmo hadal badan lagu kasbanayo waa galmo aan lagu wada qanaacsanayn.</i>
Transfobi	Transfobi	Dabeecadaha xun, fikradaha ama dare-enka ku wajahan dadka bedesha jinsiga ama bedellida jinsiga guud ahaan. Waxaa badanaaba lagu muujiyaa fikrad xun ka haysasho, yasmo, xanaaq, nacayb ama rabshad.
Transkvinna	Naag transjender ah	Qofka ku dhashay asagoo leh gus kadibna helay jinsiga sharciga ee "rag"markuu dhashay laakiinse gudaha ka dareemaya iney tahay haweeney.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Transman	Nin transjender ah	Qofka uu ku dhashay siil oo sidaas awgeed helay jinsiga "haween" markii uu dhashay, laakiin gudaha ka dareensan inuu yahay nin.
Transperson	Qof transgender ah	Ahaanshaha trans ama transjender micne-heedu waa in la jebinayo nidaamyada bulshada u yaal xag jinsi, muujin jinsi iyo aqoonsi jinsi. Waxyaalahay ay transjender-ku isaga mid yihiin waa iyadoo aqoon-sigooda jinsi iyo/ama muujintooda jinsi aysan waafaqsanayn jinsiga uu sharcigu u qoray marka ay dhasheen. Transjenderku, sida dadka kale oo dhan, waxay yeelan karaan jihayn galmo kala duwan. Eeg iyana <i>naag transjender ah, nin transjender ah iyo jinsi dhexe.</i>
Trekant	Trekant	Marka saddex qof ay isku galmoodaan isla markiiba.
Tvångsäktenskap	Guurka qasabka	Marka qof rabshad, hanjabaad fal-dam-biyeed ama ka faa'iideysashada qof ku jira xaalad ku tiirsan mukhaadaraad uu ka yeelo in qofkaa uu guursado sweden waa ka sharci darro. qaunuun ahaana waxaa loo yaqaan qasbidda guurka.
Tystnadsplikt	Waajib xog-qarin	In qofku leeyahay waajib ka saaran inuu-san gudbin warbixino qaarkood. waxay khusaysaa xirfadaha qaarkood, sida takhaatiirta, takhaatiirta cilmi-nafsiga, macalimiinta, wadaadada kiristaanka, qareen ama booliss.
Tända på	Damac	Si aad u kacsasho ama aad ku faraxdid qof ama wax kale.
Ulraljud	Qalabka shuucaaca	Baaritaan la sameeyo si loo soo saari karo sawirro dhaqaaqaya ee uurku jiifka.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Underliv	Xubinta taranka	Guska iyo siilka waxaa loo yaqaanaa Xub-naha taranka.
Undersköterska	Kalkaaliso caafimaad	Waxay la shaqaysaa daryeelka caafimaad-ka ee daryeelka qof dadka wayeelka, iyo daryeelka guriga.
Ungdomsmottag-ning	Qaabilaada dhallinyarada	Qaabilaada dadka da'doodu u dhaxay-so 13 iyo 23 sano (mararka qaarkood 25 sano) ayaa waxay heli karaan baaritaan caafimaad, qalab ka hortagga cudurrada, warbixin ku saabsan galmaada iyo xiriirka ama daaweynta.
Upphetsad	Kacsi	Dareenka jirka in qofku doonayo galmo naftiisa ama qof kale.
Urininkontinens	Xukun la'aanta kaadida	Aan awoodin in la xakameeyo marka qofku kaadinayo. Sidoo kale waxaa loo yaqaan baxsiga kaadida aan ikhtiyaarka lahayn.
Urinrör	Kaadi-mareen	Xubin u eg dhuun dhuubar oo ku taal xubinta taranka oo inoo saamaxda inaan kaadino. Kaadidu waxay soo martaa <i>kaadimareenka</i> markay ka timaaddo kaadihaysta.
Urvägsinfektion	Caabuqa kaadimareenka	Infekshanka ee ku dhaca qaybo ka mid ah kaadi mareenada oo ay keento bakteeriyyada. Calaamadaha caadiga ah waa in ay ku balbasho marka la kaadinayo iyo in ay ku qabbato kaadi badan.
Urolog	Takhtarka marinnada kaadida (Urolog)	Takhtar ku takhasusay marinnada kaadida oo ka shaqeeya qalliinka iyo daaweynta cudurrada ku dhaca marinnada kaadida ee sill iyo gus labadaba.
Utlösning	Biyo-bax	Marka shahwada ama wax qoyan ay ka soo baxaan guska, inta badan waxay la xiriiraan orgasm. Ereyga kale waa sicir. Tijaabinta sidoo kale waa marka ay ka soo baxdo qoyaanka kaadi-haysta ee xubinta taranka haweenka.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Utomkveds-havandeskap	Utomkveds-havandeskap	Dhibaato xilliga ah uurka, taas oo macne-heedu tahay in ugxanta la cabrimay ay ku hakatay ilma-galeenka banaankisa ee ugxan-sidaha.
Vaccination	Tallaal	Si aad u hesho tallaal ka difaacaya cudurrada qaarkood. Tallaalku wuxuu bilaabayaan nidaamka difaaca jidhka ee la dagaalama waxa keena cudurka, sida bakteeriyo ama fayras.
Vagina	Siil	Xubinta taranka haweenka. Siilka waxaa loola jeedaa xubinta taranka ee jirka gudihiisa ku taal laakiinse badanaaba loo isticmaalo in in lagu qeexo qaybta gudaha ee xubinta taranka iyo dibadda.
Vaginal kondom	Cinjirka siilka	Ka hortagga uurka ee caag ah oo aad galikarto siilka ama dabada marka guska la gelinayo siilka ama dabada. Sidoo kale loo yqaan femidom.
Vaginalsex	Galmada siilka	In galmo lagu sameeyo siilka, tusaale ahaan ayadoo la isticmaalayo faraha, ciyaaraha galmada ama guska.
Vaginism	Xanuunka siilka	Marka siilka la isku dayo in wax la dhex geliyo wuu isku imaanayaa. Tani waxay dhici kartaa marka xafaayad ama faashad la geliyo, inta lagu jiro baaritaanka takhtarka dumarka, haddii ay dhacdo galmo ama siigeysi.
Vara gift	Xaas leh	In xiriir guur lala gal qof kale oo ka weyn 18 sano.
Vara ihop	Xiriir la yeelato	In xiriir jacayl qof lala yeesho.
Vara kär	Cashaq	In loo yeesho dareen adag oo qof aad loo jeclaado.
Vara tillsammans	Wada jir	In xiriir jacayl qof lala yeesho.

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Vattnet går	Biyuhu way socdaan	Marka xuub axaleedyada ku dahaarnaa uurjiifka ay dillaacaan oo biyaha ku jiray ilmagaleenka ay ka soo daataan qofka uurka leh.
Venusberg	Venusberg	Meesha buuran ee ka sareysa dibnaha siilka.
Vestibulit	Vestibulit	Xanuunka gudaha iyo agagaarka xubinta taranka. Badanaa xanuun wuxuu ku qabtaa furitaanka siilka. Waxaa xitaa loo yaqaan xanuunka xubinta taranta ( <i>vulvodyn</i> .)
Vulva	Vulva	Qeybaha dibada ee siilka. Kan ka muuqda dibadda jidhka.
Våldtäkt	Kufsi	<i>Kufsi</i> waa marka qof uu qof kale oo aan raali ka ahayn u galmoodo ama ku sameeyo fal u dhigma galmo. Taasi waa dembi. Sidoo kale waa mamnuuc in loo galmoodo qof hurda ama laga faa'iideysto qof khamri ama mukhaaddaraad kale la maandoorsan. Waxaa xitaa <i>kufsi</i> ah haddii galmadu ay ku timid xoog ama hanjabaad. Eeg <i>xadgudubyo galmo</i> iyo <i>xadgudub galmo</i> .
Våldtäkt mot barn	Kufsiga carrurta	Marka qofku galmo la sameeyo carruur ka yar 15 sano iyada oo guska kelinayo siilka, afka, futada ama ayadoo la isticmaalayo walax. Muhiim maaha haddii ilmuu ayaga bilaabeen sheekada ama ay ku waafaqsan yihiin galmada. Waxay xitaa ka dhici kartaa barta internetka. Eeg ku xadgudubka galmada carruurta ( <i>övergrepp mot barn</i> ).

ERAY ISWIIDHISH	TARJUMAAD	SHARAXAAD
Vårdcentral	Xarun caafimaad	Rug la tagi karo marka la xanuunsan yahay, halkaasoo ugu horrayn lagula kulmo kalkaalisooyin caafimaad iyo takhaatiir, hase ahaatee waxaa iyana halkaa lagula kulmi karaa lataliyaha arrimaha bulshada (kurator) ama cilmi-nafsi-yaqaan.
Vårtgård	Vårtgård	Bar wareegsan oo ku heeraarsan ibta naaska. Bartu wey ka madoobtahay oo ka qalafsan tahay maqaarka naaska intiisa kale.
Äggledare	Marin ugthaneed	Xubno qaab dhuumeed leh oo ugxansidayaasha ku xiriiriya ilmogaleenka.
Ägglossning	Ugghanayn	<i>Ugghanayntu waxay qeexeyso nidaamka ay ugax uga soo go'do ugxansidaha oo ay u soo dhex marto marin ugthaneedka ilaa ay ka soo gaareyso ilmogaleenka.</i>
Äggstock	Ugghan sidaha	Xubinta Taranka gudaha ee dadka qaba afka ilma-galeenka. Waxaa jira laba ugghan-side. Halkan waxaa jira hiddaha ukunta.
Älska någon	Qof jacayl	Dareen adag oo muujinaya jacaylka qof loo qabo.
Ändring av juridiskt kön	Beddelka jinsiga sharchiyeysan	Qof ka weyn 18 sano ee uu takhtar u cayimay inuu qabo 'transsexualism' wuxuu Hoggaanka Bulshada golihiiisa arrimaha sharciga ka dalban karaa in laga baddelo jinsiga u sharchiyeysan. Akhri xitaa <i>daryeelka sixidda jinsiga, baaritaanka jinsiga, niyad xumada jinsiga</i> iyo <i>transjender</i> .
Ömsesidighet	Isweydaarsi	In dhammaan dadka isku galmoonaya ay doonayaan inay galmo sameeyaan oo isutagaan hab uu dhammaan dadka ka qaybqaadanaya oo dhan raaxo u dareemayaan.
Öppen relation	Xiriir furan	Xiriir dadka uu ka dhxeeyo ay ku heshiiyeen in xitaa galmo iyo xiriirro jacayl ay dhex maraan iyaga iyo dad xiriirkoodaas ka baxsan.



ISBN 978-91-85188-69-7

RFSU 2019 • Illustrationer: Vendela Hellstrand & Stina Lundberg • Grafisk form: Stina Lundberg

## KU-WACYIGELINTA AQOONTA GALMADA

Ku-wacyigelinta aqoonta galmada oo dhan kasta ah oo cilmi ku saleysan waxay gacan ka geysanaysaa sinnaanta aadanaha iyo jinsiga. Ku-wacyigelinta wanaagsani ee aqoonta galmada waa in laga helaa aqoon ku saabsan sida uu jirku u shaqeeyo, raaxaysiga, caadooyinka ku saabsan galmada iyo isla-dhaqanka, waana inay suurogelisaa wadahadallo ku saabsan cilaqaadyada iyo dareemada iyo waxyaalo kale oo badan.

## DARYEEL CAAFIMAAD IYO XANNAANAYN WANAAGSAN

Caafimaad wacan oo waara ee taran iyo galmo waxaa aasaas u ah xuquuqda dadweynaha ay u leeyihiin daryeelka caafimaad iyo xannaanaynta wanaagsan.

Maanta Iswiidhan caafimaadka taranka iyo galmada waa mid aan si siman loo qaybin. Aqoonta ku saabsan galmada waa inay noqtaa qayb muhiim ah oo ka mid ah nidaamka daryeelka caafimaad si loo daboolo baahida kala duwan ee jirta

## DHALI ISBEDDEL- NOQO XUBIN

RFSU waa urur xubin laga noqdo oo aad dadaalkaaga xooggiisa saari karto dan koobam, mid heer qaran iyo mid heer caalami ah, intaba.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan RFSU ka akhriso [rfsu.se](http://rfsu.se)  
Macluumaad ku qoran luuqado kala duwan waxaad ka heleysaa [rfsu.se/upo](http://rfsu.se/upo)

